

## **HABKA CABASHADA**

Qof kasta waajib ayaa ka saaran u hoggaansamidda sharciga waxana uu xaq u leeyahay in uu raadsado qaandhaw uu kaga bogsado gaboodfal ama xadgudubyo uu qofku ku andacoonayo in lagula kacay. Waa in cabashooyinka la xidhiidha guryaha lagu soo gudbiyaa sannad gudihi ka dib taariikhda ay dhacday dhibaataada uu qofku ku andacoonayo in lagula kacay. Waxa la sameeyaa baadhitaanno looga dan leeyahay in lagu ogaado in ay jirto sabab macquul ah oo horseedi karta in la rumaysto in xadgudub ka dhan ah sharcigu uu dhacay iyo in la qaado tallaabo lagu rabo in lagu saxo dhaqamada ama siyaasadaha takooridda ah. Si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho habka cabashada loo gudbin karo, booqo bogga aanu internetka ku leenahay ama la xidhiidh xafiiskayaga.

### **Gobolka Washington Guddiga Xuquuqda Aadamiga**

#### **Xarunta Dhexe ee OLYMPIA**

711 Koonfurta Waddada Capitol, Guriga 402aad  
Sanduuqa Boostada 42490  
Olympia, Washington 98504-2490  
360-753-6770

#### **SPOKANE**

Rock Pointe Plaza III  
1330 Waddada North Washington, Guriga 2460aad  
Spokane, Washington 99201  
509-568-3196

#### **EVERETT**

729 Waddada 100<sup>th</sup> SE  
Everett, WA 98208

#### **VANCOUVER**

312 SE Stonemill Dr., Dhismaha 120aad  
Vancouver, WA 98684

#### **YAKIMA**

15 Jidka West Yakima., Ste 100  
Yakima, WA 98902

#### **EAST WENATCHEE**

519 Waddada Grant  
Bariga Wenatchee, WA 98802

**Bogga Internetka: [www.hum.wa.gov](http://www.hum.wa.gov)**

**TALEEFANKA LACAG LA'AANTA AH: 1-800-233-3247**

**TTY – (taleefanka dhagoolada): 360-586-2585**

*Fadlan na soo wargeli haddii aad u baahan tahay turjumaan ama guri macquul ah.*

# KALA SOOCA GURYAHA



## GOBOLKA WASHINGTON GUDDIDA XUQUUQDA AADAMIGA

---

*Guddida Xuquuqda Aadamiga ee Gobolka Washington waxa sannadkii 1949-kii abuuray Golaha Sharci Dejinta Gobolka Washington, waxana ay Guddidu maamushaa isla markaana dhaqangalisaa Xeerka Gobolka Washington ee Ka Dhanka Ah Takoorka, Cutubka 49.60 ee RCW*

*Ujeedada Guddida Xuquuqda Aadamiga ee Gobolka Washington waxa weeyaan ka hortagista iyo tirtirista kala takoorka dadka iyada oo taa loo marayo sharciga oo si caddaalad ah loo dhaqangaliyo, iyo khayraadka oo si hufan loo adeegsado, iyo in bulshada dhexdeeda laga hirgaliyo shuraakooyin midha dhal ah.*

Guddida Xuquuqda Aadanaha ee Gobolka Washington waxa sannadkii 1949-kii abuuray Golaha Sharci Dejinta Gobolka Washington, waxana ay Guddidu masuul ka tahay maamulka iyo dhaqangalinta Xeerka Gobolka Washington ee Takoorka Ka Dhanka Ah (WLAD), Cutubka 49.60aad ee Xeerka Washington ee Dib Loo Eegay (RCW).



Waxa ay hayaddu ka shaqaysaa ka hortagga iyo cidhibtirka takoorka ama kala sooca, iyada oo taa u maraysa cabashooyinka oo baadhitaan lagu sameeyo, khilaafaadka oo habab kale lagu xaliyo, dadka oo la wacyi galiyo, tababaro la bixiyo iyo hawlaha xidhiidhka.

**Waa sharci-darro in qaybaha bulshada ee dhawrsan la takooro marka la kala iibsanayo ama la kala kiraysanayo Guryahay / Hantida Maguurtada ah**

**Qaybaha Bulshada ee Dhawrsan waxa ka mid ah:**

Isirka

Midabka

Dalka Asal Ahaan Qofku u Dhashay

Diinta

Jinsiga (lab ama dheddig)

Doorashada Jinsiga/ Aqoonsiga Jinsiga Qofka

Askartii Hore/ Xaaladda Militari ee Qofka

Naafanimada

Xaaslenimada Qofka

Xaaladda Qoyska (qoysaska haysta caruur da'doodu ka yartahay 18, ama kuwa filaya in ilmo yar u dhasho)

Sidoo kale waa **sharci darro in aargoosi lagula kaco** qof kasta oo soo gudbiya ama ka qayb qaata cabasho la xidhiidha takoorka xaga guryaha.



**WAA MAXAY TAKOORKA XAGA GURYUHU?**

**Xeerka Gobolka Washington ee Ka Dhanka Ah Takoorku** waxa uu dadka ka ilaaliyaa falalka xun ama taban ee ku kicistooda ay sabab u tahay qofka falalkaas lagula kacay oo ka mid ah qaybaha bulshada ee sharcigu ilaaliyo.

**libka iyo Kirada Guryaha:** Ma aha in ay cidina ku kacdo falalkan hoos ku xusan, kuwaas oo ku kicistooda ay sabab u tahay qofka falalkaas lagula kacay oo ka mid ah qaybaha bulshada ee sharcigu ilaaliyo:

- In uu qofku diido in uu kireeyo ama iibiyo hanti ma guurta ah
- In uu qofku diido in uu wadaxaajood ka galo kirada guriga
- In uu qofku dhigo shuruudo, xaalado ama ama mudnaan gaar ah oo la xidhiidha iibka ama kiraynta guriga
- In uu qofku adeegyo ama tas-hiilaad kala duwan ka bixiyo guryaha
- In uu si been ah u sheego in uusan gurigu diyaar u ahayn indha-indhayn ama iib ama kiro
- In uu yidhaahdo gurigu ma bannaana amaba uu si kale cid ugu diido guri
- In uu mulkiilaha ku guubaabiyo in uu guriga iibiyo ama kireeyo, si uu macaash uga helo
- In uu muujiyo xayaysiis ama qoraal dhigaya in uusan cid gaar ah rabin ama uu cid gaar ah doorbidayo, ciddaas oo ka tirsan qayabaha bulshada ee sharcigu ilaalinayo.
- In uu cid u diido in ay isticmaasho ama xubin ka noqoto tashiilaadka ama adeegyada la xidhiidha iibka ama kirada guriga
- In uu qofku dhigo shuruudo, xaalado ama ama mudnaan gaar ah inta lagu gudajiro ka wada xaajoodka ama hirgalinta ama maalgalinta iibka ama kirada hanti ma guurta ah

Haddi adiga ama qof kula nool uu naafo yahay, waxa jira dhawritaan ama ilaalin dheeraad ah. Qofka adeegyada gurigaaga bixiya uma bannaana in uu:

- In uu diido ogolaanshaha in guriga ama goob guud aad adiga oo kharashkaaga isu qaba wax ka beddel aad ku samayso, haddii ay sidaasi tahay lagama maarmaan, si qofka naafada ah uu guriga u adeegsan kar. Haddii gurigu uu kiro yahay, mulkiilaha guriga waxa u bannaan in haddii ay macquul tahay uu ogolaanshaha wax ka beddelka ku xidho in qofka guriga kiraystay uu ogolaado in uu guriga qaybtiisa gudaha ku celiyo sidii ay ahayd ka hor wax ka beddelka.
- In uu diido in uu wax ka beddel ku sameeyo xeerarka, siyaasadaha, dhaqamada, ama adeegyada, haddii wax ka baddalkaasi uu yahay mid lagama maarmaan u ah in qof naafo ahi uu helo fursad ta dadka kale la siman oo uu kuriga ku isticmaali karo kuna raaxaysan karo

**Intaa waxa dheer, waa sharci darro in la qasbo, ama la cabsi galiyo ama loo hanjabo ama faragalin lagu sameeyo qof si caddaalad ah u adeegsanaya xaqiisa guriga ama dad kale ka caawinaya sidii ay xaqa noocaas ah u adeegsan lahaayeen.**



### **DHAQAN GALINTA SHARCIGA EE CADDAAALADA AH**

Guddida Xuquuqda Aadanaha ee Gobolka Washington waa hayad dhexdhexaad ah oo ka shaqaysa xaqiiqo-raadiska iyo dhaqan-gelinta sharciga. Guddidu inta uu baadhitaan socdo uma doodo laba dhinac oo ishaya midkood, laakiin waxa ay u dooddaa sharciga iyada oo danaynaysa kahor tagga iyo cidhibtirka kala takoorka.